OREGON DEPARTMENT OF
Human Services
Developmental Disabilities Services

# Farriinta Agaasimaha

Farriintan waxaa la soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

---

**Taariikhda:** Disembar 01, 2025

**Ku socoto**: Xubnaha Bulshada I/DD iyo Shaqaalaha ODDS

**Ka socoto:** Darlene O'Keeffe, Agaasime Ku-xigeenka Kumeelgaarka ah Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)

**Mawduuca:** **Way dhammaatay hakintii kumeelgaarka ahayd ee diiwaangelinta bixiyaha**

Salaan,

Farriintan waxaa loogu talagalay naafanomada garaadka iyo korriinka (I/DD) bulshada la il daran. Warkaan wuxuu muhiim u yahay:

- Wakaaladaha bixiyaha ee mustaqbalka
- Wakaaladaha bixiyaha ee sugaya in codsiyadooda dib loo eego
- Wakaaladaha bixiyaha ee hadda jira
- Hay'adaha maareynta kiiska

**Hakinta kumeelgaarka ah ee diiwaangelinta bixiyaha ee soo bilaabatay Juunyo 2, 2025, waxay dhammaanaysaa markay tahay Disembar 2.**

Wakhtigaas, ODDS waxay bilaabi doontaa ka shaqeynta codsiyada:

- Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub ee Taageerada Nolosha Bulshada (SMA)

- Wakaaladaha bixiyaha guriga ee cusub ee shaqeeya 24-ka saac
- Guryo cusub oo 24-saac ah oo la dego oo ay maamulaan bixiyeyaasha hadda jira
- Oggolaanshaha SMA cusub oo loogu talagalay wakaaladaha bixiyayaasha ee haddeer jira.

Haddii aad sugaysay inaad codsato, waxaad xog dheeri ah ka ogaan kartaa bogga mareegtayada bixiyeyaasha la filayo. Ruqsad Bixiyeyaasha ODDS ayaa la xiriiri doona bixiyeyaasha la filayo ee codsiyadooda la xiray iyo bilawga hakinta kumeelgaarka ah ee diiwaangelinta.

## Maxay ODDS ugu samaysay hakin kumeelgaar ah oo dhanka diiwaangelinta ah noocyadan bixiyeyaasha ah?

Saddexdii sano ee la soo dhaafay, codsiyada ka imaanayay wakaaladaha bixiyeyaasha waxay kordheen 240%. Markii la eego tirada shaqaalaha ODDS, waynu awoodi waynay inaanu ka shaqeyno dhammaan codsiyada cusub. Waxaa jiray dib u dhac hawleed oo ku yimid noocyada bixiyeyaasha ee kor lagu xusay. Ka shaqaynta dib u dhacan hawleed waxay qaadatay wakhti badan oo lagu caawin lahaa bixiyeyaasha hadda jira. Shaqaalahayagu si ku filan diiradda uma saari karin caawinta farsamo iyo la socodka u hoggaansanaanta xeerarka.

Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid ayaa oggolaadeen codsigayaga ku aaddan hakinta kumeelgaarka ah ee diiwaangelinta, si aan uga shaqayno:

- Hubinta u hoggaansanaanta xeerarka maaliyadeed iyo kormeerka sharciyeed.
- Sii wanaajinta tayada adeegyada I/DD iyo taageerada macmiilka

- Xaqiijinta inay bixiyayaasha u hoggaansan yihiin xeerarka iyo badqabka dadka
- Dhimista halista ku xadgudubka iyo khiyaanada
- Hubinta in adeegyada la heli karo ay yihiin wax dadku u baahan yihiin
- Ka dhigida shaqadayada ku aaddan yoolashan mid intii hore ka waxtar badan.

## Maxay ODDS qabatay intii lagu gudajiray hakinta kumeelgaarka ah ee diiwaangelinta?

Waxaan wax ka qabanay caqabadaha kor ku xusan innagoo:

- Dhammaystirnay wanaajinta geedi-socodyada, oo ay ku jiraan hubinta tayada iyo nadiifinta xogta
- Ka wareejinayna codsiyada bixiyaha warqad ahaan kana dhigayna foomamka onlaynka
- Cusboonaysiinayna habraacyadayada, tilmaamahayaga iyo tababarradayada
- Dib-u-eegayna xeerarka si loo kala caddeeyo shuruudaha codsiga iyo mudnaan-siinta.

## Mahadsanid

Waxaan kaaga mahadcelineynaa dulqaadkaaga iyo taageeradaada intii aan ka shaqeynaynay sii wanaajintan loo baahanaa. Haddii aad su’aalo qabtid, fadlan iimayl u dir dd.licensing@odhsoha.oregon.gov.

Nabadgelyo,

Darlene O'Keeffe

Darlene O'Keeffe, Agaasimaha kumeelgaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

**Khayraadka**

- Isku diiwaangeli warbixinnada ODDS.
- Wax ka ogow dhacdooyinka ODDS.
- Isku diiwaangeli warbixinnada Adeegyada Aadanaha ee Oregon.
- Akhri farriimo ka socdo ODDS.
- Naga soo raac Facebook @oregondhs.idd